# Ilaha lagu Taageeraayo Qoysaka Luuqadaha Badan ku Hadla

## Xaquuqda uu Waalidku u leeyahay Adeegyada Turjumaada iyo Fasiraada

Dhammaan waalidiintu waxay xaq u leeyihiin xariir micno sameynaaya oo ku saabsan waxbarashada ilmahooda. Qoysaska ku hadla luuqadaha badan, tani macnaheedu waa in degmooyinku ay bixiyaan isgaarsiinta dugsiga aasaasiga ah ayagoo adeegsanaaya luuqadda guriga ee qoyska.

- Macluumaadka Turjumaada iyo Fasiraada ee loogu Talagalay Waalidiinta | Xaafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadwaynaha (OSPI) waxa uu bixiyaa warqado uu ku qoran yahay macluumaad la turjumay kuna saabsan xaquuqadaha waalidiinta ee ku aadan adeegyada turjumaada iyo fasiraada.

## Waxbarashada Oonleenka ah ama Mida Masaafada ee Ilmahaagu dhigto

Degmadaadu waa inay kuula soo xariirtaa wixii ku saabsan awoodaada iyo wixii ka karaankaaga ah si aad u siiso ilmahaaga fursad uu ku helo waxqabadyada waxbarashada oonleenka ah iyo mida masaafada. U sheeg dugsiga haddii aad u baahan tahay kumbuyuutar uu ilmahaagu guriga ku isticmaalo, isticmaalida interneetka, caawimaadda xirfadaha aasaasiga ah ee akhriska kumbuyuutarka, ama haddii aad u baahan tahay hagitaan si aad uga hesho hawlaha waxbarashada oonleenka ah adoo adeegsanaya baraha interneetka ee macalinka ilmahaaga.

- Xaafiiska Guddoomiyaha Waxbarashada Ombuds ee Gobalka Washington | Qorshaha dib ugu noqoshada dugsiga ee waxbarashada oonleenka ah looguna talagalay qoysaska luuqadaha badan.
- Degmo dugsiyeedku waxay u baahan yihiin inay bixiyaan adeegyada waxbarasho oo qaab qoraal ah qoysaska aan u heli karin adeegyada waxbarashada ee oonleenka ah ee loogu talagalay mid kasta oo ka mid ah carruurtooda da'da dugsiga ku jirta.

## Ilaha Caawimaada ee Qoysaska

Marka laga yimaado teknoolajiyada, qoysaska luuqadaha badan ku hadla waxay sidoo kale u baahan karaan caawimaada hagida helida daryeelka ilmaha, barnaamijyada waxbarashada ilma yaryar, caawimaada nafaqada iyo dakhliga, iyo adeegyada la xariira maskaxda iyo caafimaadka.

- Xiriirka Washington | Codsiga Gobalka Washington iyo nidaamka hagida daryeelka ilaha, caawimaada nafaqada iyo dakhliga, iyo daryeelka waqtiga dheer. Taleefoon ku helida adeegyada turjumaada (1-877-501-2233).
- Caawimaada Nafaqada Xiliga Aafada | U gudub qaybta hoose bogga webseetka ee laga helaayo macluumaadka turjuman kuna saabsan caawimaada qoysaska.

Washington Office of Superintendent of
PUBLIC INSTRUCTION

- Raadi Adeegyada Daryeelka Ilmaha iyo Waxbarashada Hore | caWaaxda Gobalka Washington ee Qaabilsan Caruurta, Dhallaanka, iyo Qoysaska (DCYF) ee taakuleysa hagida qoysaska.
- Ilaha Daryeelka Caruurta iyo Macluumaadka Loogu talagalay Waalidiinta iyo Daryeel Bixiyaasha | Daryeelka Caruurta ee Washington, macluumaadka la turjumay iyo marin u helida taleefoonka asagoo leh adeegyada fasiraaxada si loo helo daryeelka ilmaha (1-800-446-1114).
- Gelitaanka Buug yaraha Qoyska ee Dugsiga Xanaanada | Hagida OSPI iyo Macluumaadka la turjumay oo loogu talagalay qoysaska.
- Soo koobida Hagida Waxbarashada Gaarka ah | Hagida OSPI iyo Macluumaadka la turjumay oo loogu talagalay qoysaska.
- Dhibaatooyinka Caafimaadka Maskaxda oo Leh Caawimaad Taleefoon oo Bilaasha ah | Laanta Daryeelka Caafimaadka Washington waxay liis gareysaa lambarada taleefoonada degmooyinka si loo helo adeegyada caafimaadka maskaxda oo turjuman
- Ilaha COVID-19 ee loogu Talagalay Soogalootiga | OneAmerica waxay xiriirisaa adeegyada muhiimka ah iyo ilaha ay ka midka yihiin macluumaadka la tarjumay.
- Baaraha Ilaha | Shabakada Midnimada ee Soogalootiga Washington (WAISN) waxay soogalootiga iyo qoysaska qaxootiga ah ku xariirisaa ilaha muhiimka ah (1-844-724-3737).